



## Hoggaamiyayaasha ardayda Madison ayaa kulanka ka dhacaya Seattle la imaanaya fikrad ku saabsan isbedelka dugsiga

Ku dhawaad 40 arday oo ka kala yimid meelo kala fog sida Dallas, Texas, iyo meesha dhow ee White City, Wash., ayaa dhawaan iskugu soo ururiy hareeraha miisaska CenturyLink Field ee ku yaala Seattle, iyaga oo la imaanaya fikrad ku saabsan isbedelka ay rabeen in ay ka arkaan dugsiyadooda sare. Ardayda, oo ay ka mid ahaayeen afar ka socda Dugsiga Sare e Madison, ayaa lagu martiqaaday Seattle si ay uga qayb galaan Barnaamijka Ka qayb qaadashada & Hoggaaminta (YELL).

“Waxaan dareensan nahay in ardayda ku abuuran tahay in ay isbedel sameeyaan, sidaa darteed waxaanu rabnaa in aanu siino ilaha jira isla markaana ka codsano ardaydu in ay ka dhigaan mid dhacda,” ayay sheegtag Julie McGerry, oo maamulaha barnaamijka ka ah inspirED, oo ah ururka mas’uulka ka ah YELL.

Hoggaamiyayaasha dhallinyarada ee Madison waxay isla hadaba qayb ka cayaarayaan wanaajinta dhaqanka dugsiga. Ardayga Sanadka Labaad dhigta ee Faisal Osman iyo ardayada sanadkii saddexaad dhigata ee Fowzia Ibrahim waxay qayb ka yihiin Midowga Ardayda Muslimiinta ee dugsiga. Osman wuxuu sidoo kale ka tirsan yahay Naadiga Soo celinta Caddaalada iyo Hoggaankiisa Kooxda Sinnaanshaha. Ardayada Sanadka Labaad dhigata Ashley Rojas waxay qayb ka tahay La Rasa Unita, Kooxda Madison ee ardayda ee Laatiino, iyada oo ardayga sanadka labaad dhigta ee Ryan Moon uu yahay guddoomiyaha Barnaamijyada Madison ee AVID iyo Step Up. Da'dooda ayaa sidoo kale qayb ka ahaa sababta loo doortay. Iyaga oo ah ardayda sanadka hore dhigta, waxay ku noqon doonaan Madison sanadka soo socda waxay sii wadi doonaan shaqada ay bilaabeen sanadkan.

“Waxaan dareemaya in ay jirto meel aan wax ka wanaajin karno marka la eego dhinac kasta dugsigeena iyada oo xataa kaliya ahayn Madison, ee laakiin la eegayo dugsi kasta,” ayuu sheegay Moon. “Waxaan maqlaa aragtiyo badan oo ku saabsan dugsiyada kale ee ku yaala Waqooyiga-bari waxaanan hayaa aragtiyo badan oo la xiriira sida aan saameyn ugu yeelan karo AVID iyo Step Up iyo siyaabo aan wax uga bedeli karno Madison.”

Ardaydu waxay soo jeediyeen in iska joojinta iyo iska cayrinta dugsiga ay tahay arrin walwal leh. Waxay sidoo kale jeclaan lahaayeen in wax laga qabto ixtiraamkala xiriira dhaqamada oo dhan, iyo ixtiraamka ardayda ee macallimiinta Madison.

“Madison waxaa loo yaqaan dugsi arday kala duwani dhigato, laakiin inkasta oo uu yahay dugsiga sare ee ardayda ugu badan ee kala duwani dhigtaan, hadana dhaqamadu maaha kuwo runtii la wada matalo,” ayuu sheegay Ibrahim.

“Waxaan dareemayaan in dad badan aysan ixtiraamin kala duwanaanshaha dugsiga,” ayay hadalka raacisay Rojas.

Xal suurtagalka ah oo lagu hagaajinayo xiriirka ardayga-macallinka wuxuu ahaa maalin la isweydaarsado doorka la leeyahay.

“Haddii aan doorka la leeyahay isweydaarsan lahayn, waxaa laga yaabaa in ay ardaydu bartaan qaar ka mid ah caqabadaha iyo dhibaatooyinka ay macalimiinta la kulmaan, iyada oo macallimiintuna ogaan karaan qaar ka mid ah caqabadaha iyo dhibaatooyinka ay ardaydu la kulmaan, iyada oo ah hab midba midka kale fahmayo,” ayuu sheegay Ibrahim.

Abaabulayaasha YELL waxay bixiyeen tilmaan tallaabo-tallaabo loo raacayo oo loogu talagalay ardayda taasi oo ku saabsan sida loo doorto arrimo in wax laga qabto u baahan oo ka jira dugsigooda waxayna siiyeyen waxyaalaha ay u baahan yihii si ay u hirgeliyaan fikradahooda.

YELL iyo inspirED waxay ka soo if baxday daraasad ay samaysay Jaamacadda Yale oo 22,000 ardayda dugsiga sare lagu weydiiyay su’aal fudud: Sidee ayaad ka dareentaa dugsiga?

“10 ka mid ah ereyada ugu sarreeya ee ardayda laga duubay, sideed ka mid ahi waxay ahaayeen kuwo xun, iyada oo tobanka ugu sarreeyaa ay ahaayeen daal, walwal iyo caajis inta u dhaxaysa boqolkiiba 60 iyo 80 wakhtiyada qaarkood,” ayuu sheegay McGerry.

Markii la weydiiyay sida ay rabaan in ay dareemaan, Ardaydu waxay u sheegeen cilmi-barayaasha in ay rabaan in ay dareemaan farxad, ammaan, in la taageerayo, dhiirigelin iyo niyadooda oo kor loo qaado. Sidaa darteed inspirED waxay bilowday tallaabo ardayda lagu caawinayo si loo yareeyo farqiga u dhexeeyaa dareenkooda iyo hamigooda isla markaana loo siiyo waxyaalaha ay u baahan yihii si ay taasi u sameeyaan.

Ardayda Madison waxay doorteen Jeff Lothe, in uu noqdo u doodaha guusha ardayga ee Madison. Lothe ayaa helay afarta isaga oo macallimiinta weydiinaya in ay aqoonsadaan ardayda ay ka muuqato karti dhanka hoggaanka ah isla markaana leh rabitaanka iyo dadaal si isbedel looga hirgeliyo dugsiga.

“Hoggaamintu waa nidaam socda oo loogu talagalay in ardaydu helaan, ma ahan wax mar kaliya dhaca,” ayuu sheegay Lothe. “Rajada laga leeyahay dugsigu waa in aanu aqoonsaneyno hoggaanka aanu heysano iyo in aanu isku dayayno in aan abuurno fursadahan loogu talagalay in ardaydu in ay talaabo qaadaan marka ay diyaar yihii.”

Ardayda Madison waxay weli dhammeystirkiisa ku jiraan mashaariicda ay rabaan in ay wax ka qabtaan ka dib wakhtigoodii YELL, waxay dhammaantood aaminsan yihii in aqoon-isweydaarsigu uu ahaa mid muhiim u ah is-beddelka macnaha leh ee dugsigooda.

“Waxaan haysanay waqtii badan iyo meel si aanu dhab ahaantii u eegno arrimaha aanu u aragno si wadajir ah isla markaana inta lagu jiro waqtiga waxaanu awoodi doonaa in aan wada shaqayno si aanu iskugu nimaadno, aan dhahno waxaan ogaanay arrimahan waxbaanan ka bedeli karnaa,” ayuu sheegay Osman.

Ururka inspirED waa iskaashi ka dhexeeya Xarunta Dareenka Aqoonta ee Jaamacadda Yale, Facebook, My Brother's Keeper iyo Jaamacadda Johns Hopkins. Johns Hopkins ayaa la wareegtay dhanka la talinta ee tallaabada maamulka Obama ee My Brother's Keeper (MBK). PPS ayaa xogta barnaamijka la talinta la wadaagtay MBK isla markaana sii wada in ay sidaa la samayso Johns Hopkins. Xiriirka ka dhexeeya MBK-Johns Hopkins-PPS waa sababta ardayda Madison loogu martiqaaday Seattle.

*-Pamela Jordan*